
# Warbixinta Kooxda Ka Jawaaba Qoyska Lakala Kaxeeyay - ee Xafiiska

**Badhasaabta, Abriil 30, 2025**




Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# TUSMADA BUUGGA


**Taariikhda** ... 1

**Soo Koobista Guud** ... 1

Shaqada ... 1

Qiyamka ... 1

**Warqad Ka Socota Xoghayaha DCYF ee Tana Senn** ... 2

**Hawlaha Wakhtigan** ... 3

Guudmarka Kulamada Jiilaalka ... 3

Wada Shaqaynta Bulshada ... 5

Qaab Dhismeedka Wacyi Gelinta Dhismaha ... 5

**Aaga Siyaasada** ... 6

**Wadaagista Khayraadka** ... 7

Xarunta Khayraadka ... 7

Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo ... 8

**Saadaasha Mustaqbalka** ... 12

Barnaamijyada Bilaha ah iyo Waxyaabaha La Fulianyo ... 12

Sida Loola Socdo ... 13

**Lifaaqyada** ... 13

Lifaaqa A: Xubnaha Kooxda Wakhtigan ... 13

Lifaaqa B: Cida Bulshada La Iska Kaashado Wakhtigan ... 14

Lifaaqa C: Qoraalada iyo Bandhigyada Kulamada Kooxda ... 14

Lifaaqa D: Amarka Guud 25-04 ... 15

Lifaaqa E: Hawlaha Kooxda iyo Inta ay Le'eg Yihiin ... 16

# TAARIIKHDA

Xiligii Trump ee kowaad, siyaasado soo geleytiga ah oo aad u adag iyo dhaqan gelintoodu waxay keenan in kumanaan qoysas lakala kaxeeyo maadaama oo qaar la xidhay ama waalidkood iyo cidii ka masuulka ahayd la mastaafuriyay. Si taas looga jawaabo, hay'adaha gobolka Washington ayaa ka hawl geley sidii ay u samayn lahaayeen siyaasado gobolka ah oo kor loogu qaadayo ilaalinta caruurta iyo qoysaska ee leh xaaladaha isku jira ee deganaanshaha ee gobolkeena.

Mid kamid ah siyaasadaha ugu waawayn waxay ahayn Sharciga Sii Shaqaynta ee Washington **(https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=43.17.425)**, oo loogu talo geley in lagu xaqiijiyo in gobolka Washington uu weli soo dhaweeyo dhamaan dadka degan, oo ay kamid yihiin dadka soo geleytiga ah, iyada oo kor loo qaadayo cadaalada iyo ilaalinta xuquuqdooda sirta iyo madaniga. Sharcigan waxa uu xadidayaa ilaa inta hay'ad kastaa, oo ay kamid yihiin Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Qoyska, Caruurta iyo Dhalinyarta, DCYF) Gobolka Washington iyo ciidanka bilawga deegaanka, inay "baadhi karaan, dhaqan gelin karaan, iska kaashan karaa, ama ka caawin karaa" dhaqan gelinta shuruucda soo geleytiga ee federalka.

Xiliga labaad ee Trump, gobolka Washington waxa uu mar labaad doonayaa inuu hormariyo siyaasadihiisa iyo nidaamyada ilaaliya dadkeena leh qiimaha.

# SOO KOOBISTA GUUD

Janaayo 27, 2025, Badhasaab Bob Ferguson waxa uu saxeexay Wareegto 25-04 **(https://governor.wa.gov/sites/default/files/exe_order/EO%2025-04.pdf)** oo lagu sameeynayo Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah ee Qoyska Lakala Kaxeeyay ("Kooxda") si loo taageero caruurta waalidkood ama daryeelayaashooda la xidhay ama loo mastaafuriyay deganaanshahooda dalka. Ujeedada guud ee Kooxda waxaa weeye in la yareeyo-ilaa inta macquulka ah-waxyeelada, jahwareerka, iyo saamaynta kale ee mudada dheer ah ee caruurtu ay kala kulmayaan kala kaxaynta qoyska ee marka la mastaafuriyo ama la xidho waalidkooda ama daryeelayaashooda kowaad.

## Shaqada

Shqada Kooxda waxaa weeye in la eego siyaasadaha oo lagu taliyo iyo talaabooyinka lagu yaraynayo-ilaa inta macquulka ah-waxyeelada, jahwareerka, iyo saamaynta kale ee mudada dheer ah ee caruurtu ay kala kulmayaan kala kaxaynta qoyska ee marka la mastaafuriyo ama xidhiga la xidhiidha deganaanshaha dalka ee waalidkooda ama daryeelayaashooda kowaad.

## Qiyamka

- **Caruurta iyo Dhalinyarta Ayaa Mudnaanta Kowaad leh:** Xaqiijinta in amaanka iyo badqabka joogtada ah ee caruurta ama dhalinyarta qoyskooda lakala kaxeeyo ayaa ah mudnaanta kowaad.
- **Bilaa Aadanimada ayaa Asalka ah:** DHAMAAN caruurta iyo qoysasku waxay u qalmaan maamuus, dhaqaalayn, cod, sharciga waafaqsan, iyo fahanka xuquuqdooda.
- **Sirta ka Qaybgalaha:** Mudnaanteenu waxaa weeye in la ilaaliyo sirta iyo macluumaadka shakhsi ahaaneed ee caruurta, dhalinyarta, iyo qoyska la shaqeeyo Kooxda, oo ma wadaagi doonaa macluumaadkan iyada oo uu ku khabsanyo moojee sharciga gobolka iyo federalku.

Inta la isticmaalayo siyaasadaha saamaynta leh ee loo adeegayo dawlada gobolka oo dhan, Kooxda oo uu hogaaminayo Xoghayaha DCYF, Kooxda waxay isku keenaan hay'adaha dawlada ee u shaqeeya ee taageera qoysaska soo geleytiga ah.Waxaa kamid ah Washington State Patrol (Ilaalida Gobolka Washington), Office of Refugee and Immigrant Assistance (Xafiiska Kaalmada Qaxootiga iyo Laanta Socdaalka), Attorney General Office (Xafiiska Xeer Ilaaliyaha), Governor Office (Xafiiska Badhasaabka), iyo cida kale ee gobolka lagala shaqeeyo. *Eeg Jaantuska A si aad u aragto liis dhamayskatiran.*

Kooxda sidoo kale waxay la shaqeeyaan hay'adaha bulshada ku salaysan ee bixiya jawaabta degdega ah si gaar ah ee kiisaska qoysaska lakala kaxeeyay. Hay'adahan waxaa weeye cid ka iska kaashado u adeegista bulshooyinka qaxootiga iyo soo geleytiga ah ee gobolka oo dhan. *Eeg Jaantuska B si aad u aragto liis dhamayskatiran.*

Adiga oo la wadaagayo khayraadka, kala hadal fikirada siyaasada iyo hormarinta nidaamka, iyo dhismaha dalad wax ku ool ah iyo sii wadis, Kooxda waxay noqon karaan meel la iskugu keeno xalalka mushkiladan waawayn.

# WARQAD KA SOCOTA XOGHAYAHA THE EE
# Tana Senn



Ilaa markii uu la wareegey xafiiska Janaayo, Madaxweyne Trump waxa uu saxeexay wareegtooyin la xidhiidha laanta socdaalka iyo dhalashada, taas oo horseeday xadhi gbadan iyo mastaafuris dadka soo geleytiga ah ee dalka oo dhan. Talaabooyinkan waxay abuureen warwar badan oo bulshooyinka iyo qoysaska soo geleytiga ah.

Qoysaska leh xaaladaha isku jira ee deganaanshaha dalka kaliya kala warwarsana mastaafurista laakiin sidoo kale waxay ka baqanayaan in caruurtoodu ay la kulmaan jahwareer marka xaaladan kaligood ku habsato, oo ay waayaan cid u ololeysa. Marka caruurta iyo dhalinyarta ay kala tagaan qoysaskooda, gaar ahaan waalidkood, waxay keentaa xaalada jahwareer oo mudo dheer saamaynteedu sii jirto oo caafimaadkooda maskaxda, jidhka, iyo badqabkooda dareen ah.

**Yaraynta kala tegitaanka qoyska ee aan loo baahnayn iyo in la ilaaliyo amaanka caruurta ayaa ah adhaxda shaqada ee hay'ad ahaan aanu qabano**. Waxaa weeye DCYF yoolkeedu in caruurtu ay qoysaskooda la joogaan. Waxa aanu marka hore ku dadaalnaa midnaynta waalidka iyo caruurta hadii ay amaan tahay. Hadii ayna taasi macquul ahayn, talaabada xigta waxaa weeye in la helo cid qaraabo ah oo lagu wareejiyo. Kaliya wixii intaa ka danbeeya ayaanu eegnaa in dawladu koriso. Waxa aanu qaadi doonaa qaab lamid ah marka aanu la shaqaynayno caruurta waalidkooda ama koriyayaashooda kowaad lagu kala kaxaeeyay xadhig ama mastaafuris sharci la'aanta deganaanshaha.

Hoghayaha DCYF ahaan, waxa aan ku faanayaa in aan kala qayb gelo Badhaabka Ferguson saxeexiisa Amarka Guud ee 25-04, oo sameeyay Kooxda. DCYF waxay u tahay diyaar oo waxaa ka go'an inuu gacan siiyo ciidanka. Waxa aanu nahay hay'ado gobol iyo bulshada ay iskaashiga leeyihiin oo kala hufaya oo sheegaya siyaasadaha iyo nidaamyada si loo fududeeyo qaabka caruurtu uga tagto waalidkooda ama daryeelayaashooda ee fudud. Isla markaa, waxa aanu la socod siin doonaa shaqaalaha, bixiyayaasha, cida gacan saarka la leeyahay iyo bulshooyinka qaabka ugu wanaagsan ee loo caawin kara caruurta gobolkeena.

Waxa aan doonayaa in aan aqoonsado in aanu ka jawaabayno xaalada soo baxayasa iyo isbedelada daran ee qaabka siyaasada. Inkasta oo ay dhici karto in aanaan haynin dhamaan jawaabaha iminka, waxa aanu sii wadi doonaa in aanu wadaagno xogta ugu danbeya iyo tilmaamaha ee arrimahan, oo waxaa weli naga go'an amaanka iyo ilaalinta bulshooyinkeena kala duwan.

Waxa aan doonayaa in aan uga mahadsano Badhasaab Ferguson inuu sameeyo Kooxda si loo eego qaababka loo yaraynayo waxyeelada caruurta iyo dhalinyarta gobolka Washington. Waxa aan rajaynayanaa in aanu kala shaqayn doono hay'adaha gobolka, shaqaalaha Xafiiska Badhasaabka, iyo cida bulshada aanu ka wada shaqayno sidii loo xaqiijin ilaa inta macquulka ah inay wada u joogaan qoyska iyo caruurtooda si amaan ah.

Midba ka kale inuu daryeelo,



Xoghayaha DCYF Tana Senn
Department of Children, Youth, and Families
(Waaxda Caruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska)

# HAWLAHA WAKHTIGAN

## Guudmarka Kulamada Jiilaalka

Kooxda oo bilaabmay Febraayo 2025, waxay soo dhaweeyaan wakiilada dhamaan hay'adaha, xafiiska Badhasaabka, hay'adaha sharci ilaalinta, qabaa'ilka, iyo gudida anshaxa gobolka. Yoolashoodu waxay ahaayeen in labada kowaad lagu sameeyo fahan loo wada dhan yahay oo siyaasada murugsan ee qoyska kala kaxaynta ah iyo in la go'aamiyo waxa baaxada shaqo ay tahay si loo eego in hormar lagu wada sameeyo siyaasadan iyo nidaamyadan. Xubnaha Kooxda waxay kulmaan sadex todobaad oo kasta si ay xog isku waydaarsadaan, u baadhaan siyaasadaha, oo ay u dhisaan himilo loo dhan yahay oo lagu taageero qoysaska.

Kooxda waxay xog badan ka dhagaystaan hay'adaha gobolka oo ku saabsan siyaasadaha, khayraadka iyo nidaamyada ay sameeyeen ee lagu taageerayo qoysaska soo geleytiga ah. Hay'adaha soo socda waxay bixiyaan wakaalad:

- Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha, OSPI)
- Washington State Patrol (Ilaalada Gobolka Washington)
- Office of Refugee and Immigrant Assistance (Xafiiska Qaxootiga iyo Laanta Socdaalka), Department of Social and Human Services (Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Bilaa Aadanka)
- DCYF Child Welfare Division (Waaxda Caydha Ilmaha ee DCYF)
- DCYF Early Learning Division (Waaxda Waxbarashada Hore ee DCYF)
- Office of Homeless Youth (Xafiiska Bilaa Guriga Dhalinyarta), Department of Commerce (Waaxda Ganacsiga)

Kooxda waxay wax ka ogaadaan kaliya maaha siyaasadaha hay'adaha kala duwan, laakiin waxay ku xidhan tahay nidaamyo balaadhan oo la xisaabtan, sharci, maalgelin, iyo siyaasad. Fahanka siyaasadan iyo doonista wax ka ogaanshaha waxaa haga qiyamka Kooxda, meesha ugu sareysa:



**"Caruurta iyo Dhalinyarta Ayaa Mudnaanta Kowaad leh: Waxaanu xaqiijinta in amaanka iyo badqabka joogtada ah ee caruurta ama dhalinyarta qoyskooda lakala kaxeeyo ayaa ah mudnaanta kowaad."**

Kooxda waxay u arkaan in wada shaqayntan ay tahay wax dusha kala timid, si wanaagsan ayay dhaqanka uga fikirkaan Kooxda, oo waxay bayaamiyeen yoolashooda iyo qiyamkooda. *Eeg Jaantuska E.* Kooxda waxay u isticmaalaan macluumaadku si ay wax uga ogaadaan kulamadooda si ay uga warbixiyaan talooyinka siyaasada iyo si ay si dhaanta ugu wanaagi karaan khayraadka qoysaska Washington.

Waxaa muhiim u ah xubnaha Kooxda inay wax ka ogaadaan nidaamyada kala kaxaynta qoyska iyo madalaha siyaasad hore ee soo socda iyo xalalka, si markaa hay'adu ay diyaar ugu noqoto wada shaqaynta khabiirada ee hay'adaha bulshada lagala shaqeeyo. Abriil, Xoghayaha DCYF Senn waxa uu bilaabay inuu la kulmo khabiirada muhiimka ah ee hay'adaha si loo baro shaqada Kooxda oo loogala hadlo sida loogala shaqayn karo sidii loo gaadhi lahaa yoolka la wadaago ee amaan, qoysaska Washington ee caafimaadka qaba. Waxa aanu kusoo casuunaa qoysaskan in matalaan Kooxda Abriil ilaa Maay, oo wada shaqaynta joogtada ah waxaa lagu faahfaahiyay qaybta Wada Shaqaynta Bulshada. Wax aanu ka baranay cida aanu iskaashiga leenahay kulanka Abriil waxaa lagu soo koobay hoos, oo waxaa lagu heli karaa qaybta qoraalka ee websaytka.

**XOGTA:** Kooxda Jawaabta Degdega ah ee Kala Kaxaynta Qoyska waxay **leeyihiin wax ka badan 50 xubnood oo shaqeeya.**

### FEBRAAYO 11, 2025

- **DCYF** waxay bixiyaa xogta nidaamka badqabka ilmaha, sida ilmaha ay ula wareegtay DCYF ilaa sida ay noqotayso dib u midaynta qoysku. Websaytkeena waxaa ku jira bogaga PowerPoint **(https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/CW-Immigration-Slides.pdf)** iyo fiidyawyo **(www.youtube.com/watch?v=EyRF4m7BXMU)** macluumaadka lasoo koobay.
- **OSPI** waxay bixisaa xogta ilaalinta ardayda soo geleytiga ah **(https://ospi.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights/immigrant-students-rights-attend-public-schools)** iyo khayraadka kale ee ay heli karaan ardayda gobolka Washington.
- **Washington State Patrol (Kooxda Gobolka Washington)** waxay diirada saaraan nidaamyadooda inaan la xidhiidhin ama la kaalmaynin arrimaha soo geleytiga ee federalka. Waxay jiho u sameeyaan xadidaada wada shaqaynta qoyska la kala kaxeeyay, taas oo timaada hadii guud ahaan hadii waalidka loo xidhay ku xad gudub sharciga gobolka ah.
- **Office of Refugee and Immigrant Assistance (Xafiiska Kaalmada Qaxootiga iyo Laanta Socdaalku)** waxa uu la wadaagay masuuliyadooda qoysaska qaxootiga iyo laanta socdaalka ee uu la shaqaynayo, waxaa kamid ah qoysaska aan u qalmi n adeegyada federalka.
- **Xubnaha Kooxda** waxay si wanaagsan uga wada hadleen sida loo qeexayo masuuliyada kooxda iyo sida ay wada shaqayn tayo leh ula yeelanayaan cida bulshada lagala shaqeeyo iyo dawladaha qabaa'ilka ee gobolka oo dhan.

## MAARSO 4, 2025

- **Xafiiska Rep. Pramila Jayapal** waxay ka bixisay xog laanta socdaalka, waxay faahfaahisay dadaalkooda joogtada ah ee Baarlamaanka ee loogu ololeynayo baahiyaha qoysaska soo geleytiga ah. Waxay faahfaahisay sida shaqaalaha kiiska ee lasoo xidhiidhaya xafiiskoodu uu aad u kordhay, taas oo diirada lagu saarayo dedejinta ogolaanshaha shaqada. Shaqaaluhu waxay siiyeen kaalmada ay u baahan yihiin qaraabo raritaanka ee gacanta ay ku hayso Immigration and Customs Enforcement (Laanta Socdaalka iyo Kastamyada Maraykanka, ICE), hadii macluumaadkaan aad sideeda loo siinin.

> **XOGTA:** Waxaa jira wax ka badan **1,222,300 oo dad soo geleyti ah oo** ku sugan gobolka Washington. Waxaa weeye 15.6% shacabkeena.[1]

- **Attorney Generals Office Civil Rights Division (Waaxda Xuquuqda Madaniga ah ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud)** soo bandhigeen xogta la xidhiidha dhaqan gelinta Sii Shaqaynta ee Washington.
- **Department of Commerce's Office of Homeless Youth (Xafiiska Waaxda Ganacsiga ee Dhalinyarta Bilaa Guriga ah)** waxay faahfaahiyeen nidaamyada taageerada xafiiska ee dhalinyarta, baqdinta ku degaaman laanta socdaalka ee hoyo badan oo dadka bilaa hoyga ah ay la kulmaan. Waaxdu sidoo kale waxay siisay Kaalmo Sharci oo Dadka soo geleytiga ah ee shaqeeya, taas oo siinaysa lacag lagu matalayo dadka soo geleytiga ah ee dakhligoodu hooseeyo, iyo shaqaalahooda si ay diirada u saaraan "SAFE: Support Around Federal Efforts (Dadaalka Taageerada Federalka)."
- **Kooxda** waxay soo gabo gabeeyeen shaqadooda inta ay le'eg yahay oo waxay wadaageen qiyamka.

> **XOGTA:** Gobolka Washington oo dhan, **kala badh milyan ruux** ayaa lagu qiyaasay inuu ku adag yahay Ingiriisigu.[2]

## MAARSO 25, 2025

- **Kooxda** waxay qabteen khabiirada nidaamka siman oo lagu samaynayo jajabinta nidaamka iyo nidaamyada marka laga jawaabayo kala taga qoyska *(faahfaahintu waxay ku qoran tahay boga 6)*.
- **Attorney General's Office (Xafiiska Bilayska Degmada)** waxa uu matalayay dacwada lagu qaaday Xafiiska Bilayska Degmada Adams, kaas oo lagu sheegey inay ku xad gudbiyeen Sii Wadista Shaqada ee Washington.
- **DCYF** waxay sheegtey shaqooyinka waxbarashada hore iyo liisanka, iyo in aan looga baahnayn shahaado dhalasho/ deganaanshe sharci ah si loo helo kaabista daryeelka ilmaha ee gobolka. DCYF sidoo kale waxay wadaagtan nidaamyada xarumaha daryeelka ilmaha iyo bixiyayaasha guriga ee qoyska hadii ciidanka laanta socdaalku ay yimaadaan.
- **DCYF** waxay soo dhigeen fiidyawga ku saabsan nidaamka samofalka ilmaha **(www.dcyf.wa.gov/ FamilySeparationRapidResponseTeam)**.

## ABRIIL 16, 2025

- **Dalada Qareenada Soo Geleytiga Washington The Washington Immigration Solidarity Network, WAISN)** waxay sheegeen khayraad badan oo ay bixiyaan, oo waxaa kamid ah kooxda Ka Jawaabida Degdega ah, Khadka Difaaca Mastaafurinta, Helelaha Khayraadka, iyo Barnaamijka Cida La Socota. Waxay diirada saaraan aduunkooda xadidan iyo khatarta joogta ah ee hay'ad ahaan diirada saarta dadka soo geleytiga ah.
- **Amara** waxaa metelayay adeegyada soo duubista ee qoysaska ee lagu siiyay Degmada Pierce, sida Barnaamijka Isku Xidhka Qoyska iyo Bulshada ee daryeelayaasha. Waxay ka hadleen in 60% qoysaska loo shaqeeyo inay ku hadlaan Isbaanish oo waxay sheegeen qodobo ku saabsan tabashooyin laanta socdaalka ah.

> **XOGTA: 13% dhamaan ardayda PK-12** (qiyastii 140,000 oo arday) ayaa ah arday ku hadasha looqado badan. (OSPI, 2023)

- **Northwest Immigrant Rights Projects (Mashruuca Xuquuqda Dadka Soo Geleytiga ah ee Northwest)** ayaa soo bandhigay warar ku saabsan siyaasadaha laanta socdaalka, adeegyada badan ee ay siiyaan dadka dakhligoodu hooseeyo, iyo caqabadaha ay kala kulmeen lacagta laga jaray ee federalka ee dhalinyarta aan cid lahayn.
- **Kids in Need of Defense (Baahida Difaaca Caruurta, KIND)** ayaa faahfaahiyay adeegyada talada sharciga ah ee ay siiyaan dhalinyarta bilaa cida ah iyo sida dhib u noqotay lacagta 70% ee laga jaray ee ay ka heli jiraan dawlada federalka. Haa, waxay sii wadi doonaan inay siiyaan matalayaada sharci 400 oo kiis oo weli furan oo caruurta Washington ah.

[1] Golaha Laanta Socdaalka Maraykanka, Dadka Soo Geleytiga Washington - Golaha Laanta Socdaalka Maraykanka (**https://map.americanimmigrationcouncil.org/locations/washington**)

[2] Xog Uruurinta Bulshada Maraykanka US (**https://data.census.gov/table/ACSDT5Y2023.B16003?t=Language+Spoken+at+Home&g=040XX00US53&d=ACS+5-Year+Estimates+Detailed+Tables**), 2023

- **Isku Xidhka Qaxootiga iyo Dadka Soo Geleytiga ee Spokane** waxay sheegeen sida ay taageerada dadka reer Washington ee ku sugan xuduuda bulshada soo geleytiga ah iyo inay dhisayaan koox ka taageerada qoysaska la kulma kala kaxaynta. Waxay ka dalbadeen Kooxda inay joojitaan dhibaacada sharci darada ah ee ciidanka laanta socdaalka, si loogu abuuro dadka soo geleytiga ah meel ahaan oo ay ku noolaadaan.
- **Legal Counsel for Youth and Children, LCYC (Looyarka Sharciga ah ee Dhalinyarta iyo Caruurta)** waxay soo bandhigeen shaqadooda taageerada dhalinyarta ee maxkamadaha gobolka oo dhan oo waxay waraysteen sida DCYF ay u kordhin karto wadaagista macluumaadka la Special Immigrant Juvenile (xidhiidha Fiisayaasha Gaarka ah ee Caruurta Soo Geleytiga, SIJ).
- **Kooxda** waxay si wanaagsan uga wada hadleen sii balaadhinta qaababka aanu uga fikirno taageerada qoysaska, qaabaynta taageerada lasoo duubay ee la siiyo hay'adaha bulshada.

## Wada Shaqaynta Bulshada

Xogta laga dhagaystay hay'adaha sida tooska ah uga shaqeeya arrimaha dadka soo geleytiga ee kala duwan ee gobolka oodhan waxay xoojisay wada sheekeysiga oo waxay gacan ka gaysatay jihaynta Kooxda. Kaliya hay'adahan manay siinin aragtida "rasmiga ah" ee dadaalka mastaafurinta, laakiin waxay sidoo kale noo sheegeen shaqada na sugaysa iyo waxay nala wadaageen khayraad muhiim u ah naga caawin kara in aanu gobolka oo dhan gaadhsiino.

Si loo xaqiijiyo in aanu ku dhisno qiimaynta baahiyaha, kooxda diirada la saaray iyo dadaalka daraasadeed ayaa hore loo sameeyay, Kooxda waxay bilaabeen naqdinta xogta ee warbixinaha hore iyo waraaqaha kale ee faahfaahinaya baahiyaha la sheegey ee hay'adaha bulshada oo ay barbar socoto dadaalada kale.

Kooxda waxay sii wadi doonaan xoojinta isku xidhka bulshadeena iyo wacyi gelinta. Laga bilaabo Maay, kulanka iskaashiga bulshada ee bilaha ah ayaa bilaabmi doona, oo hay'adaha bulshada ku salaysay ayaa lagu soo casuumay si ay noola wadaagaan baahiyaha isbedelaha ee qoysaska iyo hay'adaha gobolka Washington ku sugan. *Si aad u aragto liiska dhamaystiran ee cida aanu iska kaashanayo bulshada, fadlan ka eeg Jaantuska B.*

## Qaab Dhismeedka Wacyi Gelinta Dhismaha

Bisha kowaad, waxa aanu samaynay qaab dhismeed cad oo Kooxda (*ka eeg Jaantuska E)* oo waxa aanu wadaagnay fahanka wakhtigan, iyo isbedelka, jawiga laanta socdaalka. Abriil, waxa aanu kula shaqaynayn si foolka-fool ah cida aanu bulshada ka wada shaqaynso oo arrintan khibrad durusta u leh ee aagan iyo dhismaha aqoonteena siyaasad aiyo nidaamyada. Waxa aanu iminka u wareegeynaa wajiga xigta ee wada shaqaynta wax ku oolka ah.

**XOGTA: 250 luuqadood oo kala duwan** ayaa lagaga hadlaa dugsiyada shacabka gobolka Washington, oo waxaa ku jira Ingiriisi, Isbaanish, Yukrayni, iyo Fiitnaam ayaa ugu caansan. (OSPI, 2023)

### GUDIDA ISKAASHIGA BULSHADA

Waxa aanu isku keeney koox yar oo hay'adaha bulshad aah bishii oo si taas ah u bixiya adeegyada la xidhiidhka dadka soo geleytiga. Waxay diirada saaraan gudida dayrtan si loo ogaado sida macluumaadku uu u yahay shayga ugu muhiimsan qoysaska imanka, iyo in loo sheego sida ugu wanaagsan ee loo gaadhi karo bulshooyinka.

### GUDIDA WADA SHAQAYNTA BULSHADA

Gudida wada shaqaynta bulshada waxay ka kooban yihiin xubnaha Kooxda oo sida loogu baahdo u kulma si ay u naqdiyaan qorshayaasha wada shaqaynta iyo wadaagista khayraadka wacyi gelinta qoysaska Washington. Yoolasheenu waxaa weeye in lagu xisaabtamo macluumaadka muhiimka ah ee qoysaska deegaanaada iyo meelaha kala duwan kasoo jeeda ee gobolkeena. Waxa aanu kala shaqayn doonaa cida hore aanu ula shqayno iyo khayraadka dawlada oo dhan iyo hay'adaha aad dawliga ahayn.



# AAGA SIYAASADA

Mid kamid ah yoolasheena ugu waawayn Kooxda ahaan waxaa weeye in aanu eegno hormarka siyaasadaha ee taageeri kara qoysaska khatar ugu jira mastafurinta. Ilaa markii Kooxda bilaabmeen, waxa aanu eegnay dhaw siyaasadood oo ku salaysan khibrada xubnaha Kooxda iyo cida ay bulshada kala shaqeeyaan. Hoos waxaa ku yaala siyaasadaha aanu sii wadno.

## Nidaamka khariirada

Xubnaha Kooxda ayaa ka hadlay afar xaaladood oo qoyska oo kala duwan:

- **XAALADA 1:** Qoys ayaa qaadanaya gaadhigooda kadib markay soo iibsadeen raashin markaay saraakiisha laanta socdaalku xidheen labada waalidba.
- **XAALADA 2:** Saraakiisha laanta socdaalka ayaa hawlgal ka fulisay xaafad oo xubnaha qoyska oo qoysas badan ayaa la xidhay. Caruur badan ayaa bilaa masuul looga tegey, waxaa laga yaqaan xaafada, laakiin jaarku ma hayaan macluumaad lagala xidhiidho cid qaraabo u ah ilmaha.
- **XAARADA 3:** Waa Jimce 5 galabnimo oo arday fasalka 4aad ah ayaa kasoo baxay dugsiga 3 galabnimo oo aanay weli u iman cidii kaxayn lahaydi. Ardaygan waxa uu la nool yahay hooyadii oo kaliya oo malaha xubno qoys oo gurigiisa jooga. Hooyadii ayaa kasoo kaxaysa dugsiga laakiin umay iman. Waxaa looga shakisan yahay in hooyadii ay xidheen ciidanka laanta socdaalku maadaama oo la sheegey hawlgal ay maalintaa gelinkeeda danbe fuliyeen. Dugsigu kama hayo macluumaad xidhiidh oo kale ilmaha, marka laga tago hooyadii oo taleefanka lagu waayay.
- **XAALADA 4:** Waxaa u daateen saraakiisha laanta socdaalku beer digaag ah oo ku yaala Galbeedka Washington. In badan oo kamid ah dadka la xidhay waxay ahaayeen waalid masuuliyad waalidnimo saaran tahay. Waxaa jira xarun daryeel ilme oo u dhaw beerta oo qoysas badan ay ugu jiraan caruurtu.

Xaalad kasta, xubnaha ayaa u dul maray talaabo-talaabo, oo waxay duwaan geliyeen kaalinta shaqaalaha gobolka iyo federalka ee marxalad kasta, iyo wixii caqabado ah iyo galdaloolada siyaasada. Alamitadan khariirada nidaamku waxay keeneysaa ku celin oo waxaa loo adeegsan doonaa agav ahaan lagu abuuro khad firfircoon oo lagu sheego wax oo lagu wadaago fahanka nidaamyada.

## Masuuliyada iyo qorshaha daryeelka mudada dheer ee daryeelida

In la yeesho qorshe cad, oo sare oo caruurta la daryeelayo ah hadii la mastaafuriyo ama la xidho ayaa ah talada kowaad ee kooxdaha la xidhiidha dadka soo galaytiga. Waxaa jira dhawr nooc oo masuuliyad iyo ikhtiyaaro sharci oo kale oo waalid u wakiishan karo oo leh mudo u gaar ah, ogolaanshe sharci, iyo gunooyin loogu talo geley caruurta. Waxay bixisaa ikhtiyaaro cad iyo faa'ido iyo khasaare ay u leedahay qoysaska nuqul, iyo sidoo kale ogaanshaha qaababka barnaamijyada gobolka iyo kooxaha bulshada ay u taageeri karaan oo ay uga shaqayn karaan qorshahan qoyska ee cusub ee la sameeyay.

## Fiisaha SIJ Visa tixraacyada laanta socdaalka

Labadii sano ee lasoo dhaafay, DCYF waxay la shaqaynaysay Northwest Immigrant Rights Project (Mashruuca Xuquuqda Dadka Soo Geleytiga ah ee Northwest), Kids in Need of Defense (Caruurta U Baahan Difaaca), Office of Civil Legal Aid (Xafiiska Kaalmada Sharciga ee Madani), iyo Office of Public Defense (Xafiiska Difaaca Shacabka) wixii ku saabsan tixraaca dhalinyarta ee qaba baahiyaha deganaanshaha dalka ee ay hayso DCYF. Sanadkan, nidaamka ayaa looga dhigay rasmi caruurta sharciyan xor ah iyo kuwa ku jira korinta dawlada ee mudada dheer in loo gudbiyo taageerada sharciga ee soo geleytiga. DCYF iyo cida lagala shaqeeyo bulshada ayaa laga sii wada hadli doonaa hadii iyo goorta ay ku haboon tahay in loo gudbiyo caruurta ka yar 18 jirka taageerada sharciga ee dadka soo geleytiga ah.



## Sii Wadida Shaqaynta ee Washington ee habdhismeedka dugsiga kadib

OSPI waxay samaysay tilmaamo cad oo saraakiisha dugsiga loogu talo geley oo ku saabsan sida looga jawaabayo hadii saraakiisha laanta socdaalka ee federalku ay timaado xarunta iyo sida loogu hogaansamayo Sii Shaqaynta Washington. Laakiin, waxaa la ogaaday inay jiraan galdaloolo tilmaamaha ah iyo tobobarka loogu talo geley hawlaha la xidhiidha dugsiga ee kale iyo shaqaalaha ee ku saabsan xaalada sida kormeerka waalidka ee safarada waxbarasho, hawlaha la baxsan waxbarashada, munaasabadaha isboortiga ee xarunta ka baxsan iyo barnaamijyada xagaaga. Waxa aanu si firfircoon ula shaqaynaynaa OSPI sidii loo diyaarin lahaa tilmaamaha siyaasada, oo leh tusaalayaasha barnaamijyada hore ee gudaha iyo banaanka Washington.

## Masuuliyada korinta ee maxkamada ay bixisay ee qoysaska lakala kaxeeyay

Waxa aanu dhawaan la soconaa in galdaloolo ay ka yimaadeen ikhtiyaarada qoysaska gobolka Washington. DCYF waxay la shaqaysaa qoysaska ugu jira khatarta in la mastaafuriyo ee hore loogu xidhay tacadi ama dayacaad iyo ka taageerada qoysaska khayraadka iyo nidaamka dib u midaynta. Mararkan oo kale, maxkamadu waxay go'aaminsyaa ikhtiyaarada masuuliyada ee ilmaha ku haboon. Qoysaska leh halka waalid ee aan la heli karin maadaama oo la mastaafuriyay, waxaa adag in looyarka dadka soo geleytiga ahi ay doontaan masuuliyada ruuxa kaliya ee waalidka hadhsan, marka ayna jirin tacadi ama dayacaadi. Kooxda waxay samaynayaan koox yar si loo bayaamiyo mushkilada oo talo looga biixyo, taas oo qayb kamid ah ku salaysan yahay ikhtiyaarada sharci ee lamid ah ee gobolada kale.

# WADAAGISTA KHAYRAADKA

Ogaanshaha isku duwida, iyo wadaagista macluumaadka iyo khayraadka ee Washington si loogu adeegyo qoysaska ugu jira khatarta in lakala kaxeeyo ayaa ah yoolka ugu muhiimsan ee Kooxda. Marka iskaashi balaadhan la sameeyo, wacyi gelinta joogtada ah, iyo kulmada gudida, waxa aanu ogaanaynaa khayraadka hore iyo macluumaadka ugu muhiimsan ee lagu taageerayo qoysaska Washington wakhtigan adag ee warwarka leh. Websaytkeena Kooxda waxaa ku jira wax badan oo kamid ah khayraadkan, oo inta aanu wadno qoshayaasheena xogta, waxa aanu u isticmaalnaa xarunta ay dadku kala soconayaan xogta ugu danbaysa ee waxa loo baahan yahay in laga ogaado xaalada federalka ee is dhakhso isku bedeleysa.

## Xarunta Khayraadka

Websaytka u gaarka ah **(www.dcyf.wa.gov/FamilySeparationRapidResponseTeam)** ayaa loo sameeyay websaytka DCYF si looga helo macluumaadka ku saabsan Kooxda, iyo sidoo kale khayraadka qoysaska Washington, shaqaalaha DCYF, adeeg bixiyayaasha iyo shacabku ka eegi karaan.

Websaytkeena, waxa aanu taxnay yoolashada Kooxda:

- Hormarinta lagu geliyay ee siyaasadaha iyo nidaamyada gobolka oo dhan.
- Samaynta iyo wadaagista khayraadka qoysaska ku jira khatarta in la kala kaxeeyo.
- Iskaashiga hay'adaha bulshad ku salaysan.

Waxaa la geliyay websaytka khayraadka hay'adaha bulshada aanu kala shaqayno si ay qoysasku u heli karaan. Marka la wado qaabka “xarunta”, waxa aanu doonaynaa in websaytku uu muujiyo oo uu kor u qaado khayraadka gobolka oo dhan. Tusaale ahaan, websaytkeena waxa aad wax ka ogaan kartaa sida loo gaadhsiiyo ficilka laanta socdaalka WAISN, samaysashada Qorshaha Amaanka Dadka Soo Geleytiga ah ee qoysaskaaga, sida loo helo taageerada Xarunta Ka Jawaabida Degdega ah ee WA State Commission on Hispanic Affairs (Gudida Gobolka WA ee Arrimaha Hisbaaniga). Waxa aanu si joogto ah u hormarinayaa sida lagu heli lahaa websaytka iyo macluumaadka kale. Websaytka waxaa loo turjubay oo lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish, iyo Soomaali. Inta aanu hore u socono, waxa aanu ka shaqayn doonaa sidii websaytka aanu uga dhigi lahayn mid la heli karo, isaga oo leh ikhityaaro turjubaad oo badan iyo noocyo saxaafadeed oo dheeraad ah.

Yoolka kale ee websaytkeenu waxaa weeye in loosoo waarido bayaamin shaqada Kooxda. Kaliya gelin mayno ajandayaasheena iyo warbixinta kulamada laakiin waxa aanu si joogto ah uga shaqayn doonaa abuurista xog ay heli karaan qoysaska doonaya xog badan inay ogaadaan. Tusaale ahaan, waxaa nasoo gaadhay su'aalo badan oo ku saabsan waxa ku dhaca caruurta ku jirta daryeelka DCYF hadii lakala kaxeeyo qoysaskooda. Fiidyawgan **(www.youtube.com/watch?v=EyRF4m7BXMUwaxa)** uu bixiyaa macluumaad ku saabsan sida laanta socdaalku ay kaalin uga ciyaarno nidaamka badqabka ilmaha ee DCYF. Dadaalkan lagu sugayo in qoysaskeena inay si wanaagsan ula socdaan waxay kusii socotaa baraha bulshada inta aanu socono.

## Su'aalaha Badanaa La-isweydiiyo

Waxa aanu samaynay liiska Su'aalaha Badanaa La Is Waydiiyo (FAQs) oo websaytkeena ayaan gelinay. Su'aalaha waxaa laga sameeyay kuwa naloogu soo diray iimeelka **(dcyfimmigrationEO@dcyf.wa.gov)**, laga heley saxaafada, iyo xubnaha Kooxda iyo cida aanu bulshada kala shaqayno.

### FAQS WAKHTIGAN:

**S** **Sidee ayay waalidka/masuulka diyaar ugu noqon karaan hadii si lama filaan ah loo xidho ama loo mastaafuriyo?**

**J** Waalidka waa inuu iminka u diyaar garoobaa isaga oo samaysanaya cid masuuliyada ilmaha ama caruurta la wareegi karta. Hal xog oo wax tar leh waxaa weeye Qorshaha Amaanka Dadka Soo Geleytiga ee LCYC **(https://lcycwa.org/resources/immigration)**, oo wakhti xaadirkan lagu heleyo Ingiriisi, Isbaanish, iyo Carabi. Waalidka sidoo kale waa inay akhriyaan xogta sharciga ama kala hadlaan looyar gaar ah waxa la samaynayo hadii la mastaafuriyo. LCYC waxay gelisay xog websaytkeeda **(https://lcycwa.org/resources/immigration)** oo waxay bixisaa tobobar lagaga caawinayo waalidka inay diyaariyaan cida hayn lahayn caruurtooda hadii la xidho ama mastaafuriyo.



**S** **Ma khasabaa in aan noqdo koriye/bixiye daryeelka qaraabo oo liisan haysta si aan u hayno ilmaha waalidkii aniga igu magacaabeen in aan hayo? Ma in aan u diyaar garoobaa in aan hayo ilmahan? Ma jirtaa wax taageero ah oo lagu heli karaa?**

**J** Waxa aad hayn kartaa ilmo ay kaaga tageen waalidkii adiga oo aan haysan liisan korista ilmaha ah. Si aad ugu diyaar garawdo tan, waxa aad ka akhrin kartaa Qorshaha Amaanka Dadka Soo Geleytiga ah (**https://lcycwa.org/resources/immigration**) iyo fiidyawyada tobobarka (**www.youtube.com/watch?v=kHIAj2JMTQc&feature=youtu.be**), Magaabista Cida Kale iyo Foomka Korsashada Ilmaha yar, iyo khayraadka kale ee ay tahay in Laga Ogaado Xuquuqdaada OAG (**www.atg.wa.gov/know-your-rights-civil-immigration-enforcement-washingto**n) waxay ku jiraan websaytka, ama websaytka LCYC. Waxa aanu sidoo kale ku talinaa xogta soo socota:

- Helaha Xogta WAISN **(https://resources.waisn.org)**
- Agabka Xogta ORIA **(https://app.smartsheet.com/b/publish?EQBCT=8e7e2fd0641f4f1e90bbaa36a0bc232d)**
- Xarunta Jawaabta Degdega ah — Gudida Gobolka Washington ee Arrimaha Hisbaaniga **(www.cha.wa.gov/rapid-response-hub)**

**S** **Sidee ayay degmo dugsigu u taageeri kartaa caruurta iyo qoysaska wakhtigan?**

**J** Office of the Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Maamulaha Tilmaamaha Shacabka, OSPI) waxay diyaariyeen tilmaamo la xidhiidha ilaalinta la siiyo ardayda soo geleytiga ah (**https://ospi.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights/immigrant-students-rights-attend-public-schools**) ee ku sugan gobolka Washington. Inta aanu sii wadno Kooxda, waxa aanu iskaashi la sii wadi doonaa degmo dugsiyeedyada oo waxa aanu taageeri doonaa waxbarshada dhamaan dhalinyarta iyada oo aan loo eegeynin xaaladooda deganaanshaha dalka.

## S Waa maxay kaalinta DCYF marka hadlayo caruurta waalidkooda/masuulkooda sharci la xidhay ama laga mastaafuriyay dalka?

**J** Marka ay ICE xidho waalid, waxay waydiiyaan qoyska hadii ay jirto qaraabo ama saaxiib daryeeli kara ilmaha. ICE waxay kaliya la xidhiidhaa DCYF hadii:

- Waalidku aanu heli karin ruux amaan ah oo hayn kara ilmaha.
- Hadii walaac laga muujiyo ruuxa loo doortay inuu hayo ilmaha.

Mararkaas oo kale, ICE waxay ogaysiin doontaa ciidanka deegaanka, oo ilmaha waxaa lagu wareejin doonaa dawlada oo waxaa loo wareejin doonaa DCYF. Hadii ilmaha aanu la joogin waalidka marka la mastaafurinayo oo ay hayso bulshadu ama xarun daryeelka ilmaha oo joogo, waxa aanu uga fadhiyaa cida bulshada aanu kala shaqayno inay wargeliyaan bilayska ama DCYF.

Waxaa weeye DCYF yoolkeedu in caruurtu ay qoysaskooda la joogaan. Inta ay DCYF ka shaqaynayso sidii ilmuhu ula midoobi lahaa waalidkii, DCYF waxay kala sahqayn doonaa xubnaha qoyska ee deegaanka degan ama qaraabada. Hadii cid loo waayo, ilmaha waxaa la gelin doonaa nidaamka korsashada dawlada inta shaqaalaha bulshadu ay isku deyayaan inay dib u mideeyaan qoyska.

## S Miyaa DCYF ka caawin karaa dib u midaynta hadii ilmuhu uu dalbado in uu la midoobo waalidka la mastaafuriyay?

**J** Haa. Marka ay DCYF hesho meelaynta iyo ogolaashaha daryeelka ilmaha, DCYF waxay ka shaqayn doontaa midaynta ilmaha ee waalidka amaanka ah - xataa hadii ay tahay meel ka baxsan dalka.

## S Miyaa DCYF la wadaagtaa xogta ICE?

**J** Keep Washington Working, (Sii Wadista Shaqada Washington, KWW), DCYF ma siiso macluumaad ICE iyada oo ayna jirin amar maxkamadeed ama waaran, ama marka uu jiro siin macluumaad oo uu waalidku saxeexay. Dhamaan hay'adaha gobolka Washington waxa u hogaansamaan KWW, oo dhigaya: "Wax hay'ad gobol ah, oo ay kamid yihiin bilayska, uma isticmaali karto [xogta] si ay u baadho, dhaqan geliso, ula shaqayno, ama u kaalmayso baadhitaan ama dhaqalin gelin wax arrin federal ah ... barnaamijyada ama wixii sharci, shuruuc ama siyaasado kale oo lagu bartilmaameedsanayo dadka degan Washington taas oo ku salaysan qoomiyad, diin, xaalada deganaanshaha ama dhalashada, ama qoomiyada ama qaranka uu ruuxu kasoo jeedo."



## SU'AALAHA BADANAA LA ISKA WAYDIIYO WAA LA SAMAYNAYAA:

Inta aanu wada hadlanay, waanu qoranaynay su'aalaha muhiimka ah ee la is waydiiyay. Yoolkeenu waxaa weeye in si dhakhso ah loo helo jawaabo dhamaystiran oo sax ah. Qaar badan oo kamid ah su'aalahan waxay leeyihiin raad sharci iyo siyaasad, markaa waxa aanu si dhaw ugala shaqaynaa kooxdeena sharciga, xubnaha Kooxda, iyo shaqaalaha hay'ada gobolka. Waxa aanu si joogto ah usoo geliyaa websaytkeena inta aanu ka jawaabayno su'aalaha aanu helnay. Hadii aad doonayso inaad u gudbi su'aal Kooxda, fadlan iimeel noogu soo dir **dcyfImmigrationEO@dcyf.wa.gov**.

### Xogta/Tirakoobka

- Imisa caruur ah oo gobolka Washington jooga ayuu saameeyay xadhiga ama mastaafurinta waalidku ee sharci la'aanta deganaanshaha darteed?

### Diyaarinta Qoyska

- Maxaa dhacaya hadii aan si lama filaan ah uga tago dalka? Sidee ayaan ugu heli karaa cid haysta ilmahayga? Miyay ku filan tahay in aan afka ka sheego cida haynaysa?

### Dib u Midawga Qoyska

- Sidee ayay Kooxda u xaqiijin karaa in waalidku ay ka qayb geli karaan nidaamka cida ay ka masuulka yihiin?

### Korsashada

- Hadii Awood Qareen ayna jirin, miyaa DCYF ka caawin kartaa waalidka ama miyay cid kale u samayn karaa iyada oo ayna jirin Heshiiska Meeleynta Ikhtiyaarka ah iyo eegitaan taariikhda hore ee ruuxa?
- Sidee ayaa ruuxa la gashaday xogta xidhiidhka xaalada degdega ah loogu ogolaanayaa inuu daryeelo ilmaha gaar ahaan hadii ayna jirin waraaqo rasmi ah oo loogu wareejiyay korsashada?

### ICE

- Sidee ayaad ku ogaanaysaa marka waalidka la qaado/qabto oo la geeyo xarunta dadka soo geleytiga ah/la mastaafuriyo inuu ilmo ka tagay?
- Sidee ayay ICE u go'aamisaa halka ilmaha la geynayo hadii ay la joogaan waalidka marka la qabto?
- Waa maxay nidaamka ICE ee "ilmaha yar ee aan cid lahayni"? Ma jiraan siyaasad ama sharci?

### Gobolku Hayo

- Khayraad caafimaadka maskaxda oo sidee ah ayay heli karaan dadla dhalinyarta ah ee waalidkood la mastaafuriyay ama la xidhay?
- Adeegyo sharci oo sidee ah ayay heli karaan dhalinyartu?
  Miyay tani khusaysaa dhalinyarta xidhan?
- Miyaa adeegyadan la siiyay dhalinyarta ay hayso DCYF ee caruurta ay dhaleen dadka soo geleytiga ah oo aanu u helin karin sharci la'aanta ay dalka ku joogaan darteed iyo sidee ayay waaxdu gacan uga gaysanaysaa sida loo heli lahaa adeegyadan?
- Sidee ayay Kooxda u arkaan kaalintooda hadii qoyska lagu kala kaxaeeyo ilmaha/ruuxa dhalinyarta ah ee dib ay ugu xidhay ORR (sida, cida kafaale qaaday la xidhay oo ruuxa dhalinyarta ah lagu celiyo gacanta ORR)? Miyay qorshayaashani yihiin ikhtiyaar kale oo xadhiga ah, sida ku wareejinta xubnaha qoyska oo kale, ama korsashad dalwada kahor inta ilmaha/ruuxa dhalinyarta ah la xidhin?

## Adeegyada Daryeelka Gobolka

S Hadii aanu gobolku haynin khayraadka qoysasku u baahan yihiin, sidoo loogu xidhi karaa qoysaska khayraadka bulshada?

## Sii Wadista Shaqada Washington

S Sidee ayaanu u tobobarnaa barnaamijyada waxbarashada kadib ee Sii Wadista Shaqada Washington? Miyay khusaysaa?

## Baro Xuquuqdaada

S Waxa aan maqlay inay jiraan waaran baadhitaan oo nooc kale ah, mid loo baahan yahay in loo hogaansamo iyo mid kale oo ayna khasab ahayn in loo hogaansamo. Ma dhabaa? Sidee ayaan ku kala garanayaa?

## Fashilka Siyaasada

S Sidee ayay wax noqonayaan marka magaalooyinka ama degmooyinku ay gacan siiyaan ICE? Khayraad sidee ah ayay qoysasku hayaan?

## Dib u Midawga

S Sidee ayay Kooxda uga caawin karaan dib u midaynta hadii ilmuhu uu dalbado in uu la midoobo waalidka la mastaafuriyay?

## Iskuulo

S Miyaa ICE la xidhiidhaa dugsiyada si ay u hesho macluumaadka marka qoysaska kala kaxeeyo?

## Dugsiyada, Xarumaha daryeelka Ilmaha

S Sidee ayay DCYF uga shaqaysaa OSPI iyo xarumaha daryeelka liisanka haysta in loo sameeyo nidaamyo iyo qaabab marka ardaydu ay ka tagaan dugsiga ama xarunta daryeelka?

## Siyaasada DCYF

S Ma waxaa jira nidaamyo kala duwan oo caruurta DCYF ay hayso ee aan haysan waraaqo?



# SAADAASHA MUSTAQBALKA

## Barnaamijyada Bilaha ah iyo Waxyaabaha La Fulianyo

Waxa aanu samaynay shax hawlo, mawduucyo, iyo barnaamijyo si loo wada shaqeeyo oo diirada ay uga saaraan Kooxda bilaha soo socda. Waxay ku xisaabtamaan:

- Xidhidhka koraya ee hay'adaha bulshada ee xawaaraha iskaashiga.
- Habaynta shaqooyinka gacanta lagu hayo ee kuwa ugu murugsanaanta yar.
- Dhismaha aqoonta iyo fahanka ee xubnaha Kooxda.
- Samaynta siyaasad joogto ah oo sii jirta wakhti ka badan sanadka la siiyay Kooxda.
- In loosoo reebo meel ikhtiraaca iyo ka jawaabida ee isbedelada xaalada federalka.

Kuwani waa qorshayaasha hore, oo waxa aanu ku eegeynaa sida loo kala hufi lahaa iskaashiga hay'adaha gobolka iyo hay'adaha bulshada, iyo ka jawaabitaanka wakhtiga aanu ku jirno.

**Barnaamijyada bilaha ah iyo waxyaabaha la bixiyo wey is bedeli karaan.*



| | Mawduucyada iyo Barnaamijyada | Shaqooyinka |
|---|---|---|
| WINTER 2025 | • Wareegto ayaa la saxeexay | • Ogaanshaha hogaanka hay'ada gobolka.<br>• Dhismaha qaab dhismeedka iyo yoolashada Kooxda.<br>• Matalaada hay'adaha gobolka. |
| SPRING 2025 | • Bilawga wada shaqaynta cida bulshada la iska kaashado iyo xidhiidhka u dhaxeeya dawlada ee qabaa'ilka<br>• Diyaarinta qoyska<br>• Khadad marka hore la diyaariyay oo isgaadhsiin | • Bandhigyada laga heley cida bulshada lagala shaqeeyo.<br>• Warbixinta kowaad waxay ku eeg tahay.<br>• Ogaanshaha iyo wadaagista iyo bandhigyada si looga caawiyo qoysaska inay u diyaar garoobaan kala taga qoyska ee iman kara.<br>• Samaynt liiska Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo (FAQs) iyo si joogto u gelinta jawaabaha websaytka.<br>• Ka hadal xaaladaha kala duwan ee xagaaga bilaa dugsi, xadidaada daryeelka ilmaha.<br>• Abuurista layn lasii sameeyay oo isgaadhsiin oo hay'adaha gobolka iyo gudida, degmo dugsiyeedka, maxkamadaha, Qunsuliyadaha, hogaamiyayaasha baarlamaanka, iyo cida iskaashiga lagala leeyahay bulshada si loo xaqiijiyo in iskaashi joogto ah iyo gacan saar loo yeesho. |
| SUMMER 2025 | • Khayraadka luuqada iyo turjubaada<br>• Daryeelka Jahwareerka Laga Warqabo | • Khayraadka iyo ka wada hadalka khayraadka la is dhax geliyay iyo siyaasadaha.<br>• Qaybta labaad waxay ku eeg tahay.<br>• Ka wada hadalka tobobarka iyo nidaamyada wanaagsan ee daryeelka jahwareerka laga warqabo ee kala kaxaynta qoyska ee la xidhiidha sharciga deganaanshaha dalka.<br>• Akhrinta xogta. |
| FALL 2025 | • Dhismaha adkaysiga xidhiidha/soo koobitaanka khayraad wadaaga | • Foorumka xoojinta daladaha iyo dhismaha xidhiidhka korsashada oo u dhaxeeya hay'adaha ay bulshadu hogaamiso.<br>• Warbixinta sadexaad waxay ku eeg tahay. |
| WINTER 2026 | • Naqdinta Warbixinta Ugu Danbaysa | • Warbixinta ugu danbaysa waxay ku eeg tahay. |

## Sida Loola Socdo

Cida iskaashiga lagala leeyahay bulshada, hay'adaha bulshada, iyo qoysaska waxaa lagu dhiiri geliyaa inay iska duwaan geliyaan **www.dcyf.wa.gov/FamilySeparationRapidResponseTeam** si loo helo iimeelka xogta ee shaqada Kooxda. Xogta waxaa wakhtigan lagu bixiyaa Ingiriisi, Isbaanish, iyo Somali. Inta aanu xogteenu u diyaarinayno dad balaadhan oo Washington oo dhan ah, waxa aanu u tilmaami doonaa dadka ku jira listserv inay helaan wararka iyo xogta ugu danbaysa. Bayaanada listserv waxaa kamid ah tilmaamaha hay'adaha bulshada lagala shaqeeyo sida ay u qaybiyaan xogta aanu bixino, sida bayaanada oo lagu qoro luuqado badan, iyo macluumaadka lagu soo bandhigay qaabka maqal iyo muuqaalka ah.



# LIFAAQYADA

## LIFAAQA A: Xubnaha Kooxda Wakhtigan

ADMINISTRATIVE OFFICE OF THE COURTS (XAFIISKA MAAMULKA MAXKAMADAHA, AOC)
Hay'ada Gobolka

ATTORNEY GENERAL'S OFFICE (XAFIISKA XEER ILAALINTA)
Gobolka Hoos Yimaada

COMMISSION OF HISPANIC AFFAIRS (GUDIDA ARRIMAHA HISBAANIGA)
Hay'ad Gobol

COMMISSION ON ASIAN PACIFIC AMERICAN AFFAIRS (GUDIDA ARRIMAHA AASIYAANKA BAASIFIGA MARAYKANKA)
Gudida Gobol

DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES (WAAXDA CARUURTA, DHALLINYARADA, IYO QOYSASKA)
Hay'ad Gobol

DEPARTMENT OF COMMERCE (WAAXDA GANACSIGA)
Hay'ad Gobol

DEPARTMENT OF HEALTH (WAAXDA CAAFIMAADKA)
Hay'ad Gobol

DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES (WAAXDA ARIMAHA BULSHADA IYO ADEEGYADA CAAFIMAADKA)
Hay'ada Gobolka

DSHS - OFFICE OF REFUGEE AND IMMIGRANT ASSISTANCE (XAFIISKA QAXOOTIGA IYO CAAWINTA SOCDAALKA)
Hay'ada Gobolka

GOVERNOR'S OFFICE (XAFIISKA BADHASAABKA)
Gubernatorial

HEALTH CARE AUTHORITY (MAAMULKA DARYEELKA CAAFIMAADKA)
Hay'ada Gobolka

OFFICE OF CIVIL LEGAL AID (XAFIISKA KAALMADA SHARCIGA EE MADANIGA)
Gobolka Hoos Yimaada

OFFICE OF EQUITY (XAFIISKA SINAANTA)
Hay'ad Gobolka

OFFICE OF INDIAN AFFAIRS (XAFIISKA ARRIMAHA HINDIDA)
Hay'ad Gobol

OFFICE OF PUBLIC DEFENSE (XAFIISKA DIFAACA SHACABKA)
Gobolka Hoo Yimaada

OFFICE OF SUPERINTENDENT OF PUBLIC INSTRUCTION (XAFIISKA KORMEERAHA GUUD EE WAXBARASHADA DADWEYNAHA)
Hay'ad Gobol

OFFICE OF THE EDUCATION OMBUDS (XAFIISKA WAXBARASHADA U ADEEGAHA)
Gubernatorial

PROFESSIONAL EDUCATOR STANDARDS BOARD (GUDIDA HEERARKA MACALIMKA XIRFADLAHA AH)
Hay'ad Gobol

STATE BOARD FOR COMMUNITY & TECHNICAL COLLEGES (GOLAHA GOBOLKA EE BULSHADA IYO KULEEJKA FARSAMADA)
Hay'ad Gobol

STATE EDUCATION BOARD (GUDIDA WAXBARASHADA GOBOLKA, SBE)
Hay'ad Gobol

WASHINGTON STATE PATROL (ILAALADA GOBOLKA WASHINGTON)
Hay'ad Gobol

WASHINGTON STUDENT ACHIEVEMENT COUNCIL (GOLAHA GUUSHA ARDAYDA WASHINGTON)
Hay'ad Gobol

WOMEN'S COMMISSION (GUDIDA DUMARKA)
Gudi Gobol

## LIFAAQA B: Cida Bulshada La Iska Kaashado Wakhtiga

### Cida Bulshada Lagala Shaqeeyo - Wada Shaqaynta

Amara

Kids in Need of Defense (Caruurta Difaaca U Baahan)

Legal Counsel for Youth and Children (Looyarka Sharciga ah ee Dhalinyarta iyo Caruurta)

NW Immigrant Rights Project (Mashruuca Xuquuqda Soo Geleytiga NW)

Office of Congresswoman Jayapal (Xafiiska Xildhibaanad Jayapal)

Office of Senator Patty Murray (Xafiiska Xildhibaanka Patty Murray)

OneAmerica

Refugee and Immigrant Connections Spokane (Ku Xidhitaanka Qaxootiga iyo Dadka Soo Geletiga ah Spokane)

Taylor Tots Childcare Centers Inc.in Yakima (Xarumaha Daryelka Ilmaha Taylor Tots ee Inc.in Yakima)

WA Immigrant Solidarity Network (Dalada Ilaalinta Soo Geleytiga WA, WAISN)

### La Shaqaynta Cida Lagala Shaqeeyo Bulshada

Akin

Be the Way Home (This is name and should stay this way)

Catholic Community Services (Adeegyada Bulshada Kaatooliga)

Community Health Care (Daryeelka Caafimaadka Bulshada)

Equity In Education Center (Xarunta Sinaanta Waxbarashada)

ESD 123

Family Education & Support Services (Adeegyada Waxbarashada iyo Taageerada Qoyska, FESS)

Guatemalan Consulate (Qunsuliyada Guatemala)

Inatai

Jewish Family Service (Adeega Qoyska Huduuda ah)

King County Early Learning Coalition (Iskaashatada Waxbarashada Hore ee Degmada King)

Latina Educational Training Institute (Hay'ada Tobobarka Waxbarashada Latina)

Latino Leadership NW (Hogaanka Latino ee WN)

Little Scholars Childcare (Daryeelka Ilmaha Deeqaha Waxabrashada Yar)

Lutheran Community Services Northwest (Adeegyada Bulshada Lutheran ee Northwest)

Nuestra Casa (Yakima)

NW Justice Project (Mashruuca Cadaalada NW)

Office of Congressman Smith (Xafiiska Xidhibaan Smith)

Pacific County Immigrant Support (Taageerada Dadka Soo Geleytiga Degmada Pacific)

Satsuma Designs LLC

Tacoma Community Member (Xubinta Bulshada Tacoma)

VOCA- WA

Whatcom County Health and Community Services (Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Degmada Whatcom)

## LIFAAQA C: Qoraalada iyo Bandhigyada Kulamada Kooxda

Dhamaan kulamada ajandaha iyo warbixinaha kulmada waxaa laga heleyaa websaytka Kooxda **(www.dcyf.wa.gov/FamilySeparationRapidResponseTeam)**.

### Febraayo 11, 2025

Ajandaha: **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/2.11.25_EOTaskForce_Agenda.pdf**

Warbixinta Kulanka: **https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/021125-EOTaskForce-Minutes.pdf**

### Maarso 4, 2025

Ajendaha: **https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/3.4.25_EOTaskForce_Agenda.pdf**

Qoraalka Kulanka: **https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/030425_EOTaskForce_Minutes.pdf**

### Maarso 25, 2025

Ajandaha: **https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/3.25.25_EOTaskForce_Agenda.pdf**

Qoraalka Kulanka: **https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/032525_EOTaskForce_Minutes.pdf**

### Abriil 16, 2025

Ajenda: **https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/04.16.25_EOTaskForce_Agenda.pdf**

Qoraalada Kulanka: **https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/041625_EOTaskForce_Minutes.pdf**

## LIFAAQA D: Amarka Guud 25-04

Ilaalinta qoysaska soo geleytiga ah iyo ka jawaabida qoyaska kala kaxeeyay.

**HALKA**, Washington ay ka tahay gobol la wada leeyahay oo leh soo dhawayn oo ku amaanan kala duwanaanshaha dhamaan dadka, qoysaska, iyo bulshooyinka; iyo

**HALKA**, qoysaska Washington ee meel kasta iyo dhaqan kasta ay gacan wayn ka gaystaan badqabka iyo qaninimada Gobolkeena iyo bulshooyinkeena deegaanka; iyo

**HALKA**, Washington ay qiimayso xidhiidhka qoysaska iyo xubnaha qoyska u dhaxeeya, gaar ahaan caruurta iyo waalidkooda ama daryeelayaasha kowaad; iyo

**HALKA**, kala kaxaynta qoysaska soo geleytiga ah marka la mastaafuriyo ama la xidho ay keenta waxyeelo oo ay khalkhaliso bulshooyinkeena, dugsiyadeena, goobaheena shaqo iyo meelaha aanu ku cibaadaysano; iyo

**HALKA**, mastaafurinta ama xadhiga waalidka ilmaha ama daryeelihiisa kowaad ay ku keeni karto in ilmaha uu la kulmo caqabado badan oo dhamaystirashadiisa waxbarashada ah, oo ay keeni karto saamayn wayn oo caafimaadka iyo badqabka ilmaha guud ahaan; iyo

**HALKA**, marka waalidka ilmaha ama daryeelihiisa kowaad la mastaafuriyo ama la xidho, ilmuhu waxa uu la kulmi karaa caqabad gaar ah oo kumeel gaadh ah ama mudada dheer ah oo xanaanada guriga ah, waxaa kamid ah xidhiidhka dhaqankiisa, luuqadiisa, iyo jahwareer mudo dheer oo kala kaxaynta waalidkii ka timdaada.

**IMINKA, MARKAA**, Aniga oo ah, Bob Ferguson, Badhasaabka gobolka Washington, sida uu awood isku siiyay Dastuurku iyo shuruucda gobolka Washington, aan halkan ku amarayaa oo aan ku farayaa Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarta iyo Qoysaska, DCYF) inay dhakhso u sameeyaan Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah ee Kala Kaxaynta Qoyska si loo eego talooyinka siyaasadaha iyo talaabooyinka lagu xakamayn karo-ilaa inta macquulka ah-waxyeelada, jahwareerka, iyo saamaynta rasmiga ah ee caruurta la kulmay kala kaxaynta qoyska marka laga mastaafuriyay ama laga xidhay waalidkood ama cida korinaysay.

DCYF waa inay kala tashato Xafiiska Badhasaabka si marka loo helo xubnaha Kooxda Ka Jawaabitaanka Degdega ah, kuwaas oo ay tahay inay ka koobnaadaan xirfadlayaal DCYF; ugu yaraan hal wakiil oo ka socda Ilaalada Gobolka Washington, Office of Refugee and Immigrant Assistance (Xafiiska Kaalmada Qaxootiga iyo Dadka Soo Geleytiga ah), iyo Xafiiska Badhasaabka; iyo xubnaha hay'adaha gobolka sida ku haboon.

Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah waa inay ku qabsataa kulanka kowaad wakhti aan ka danbaynin Febraayo 14, 2025, oo waa inay u kulantaa dhakhso iyo si joogto ah sida loogu baahdo si loo sameeyo khidado wax ku ool ah oo lagaga jawaabayo waxyeelooyinkan.

Masuuliyadaha Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah waxaa kamid ah, laakiin kuma koobna, kuwa soo coda:

- Akhrinta siyaasadaha hay'ada iyo nidaamyada lagu garanayo wixii isbedelo lagu taliyay ee nidaamka ee gacan ka gaysan kara ka jawaabitaanka gaar ah ee kala kaxaynta lama filaanka ah ee qoyska, waxaa kamid ah xaaladaha ay tiro badan oo caruur ah oo isku meelo kasoo jeeda ay ula kulmi karaan kala kaxaynta qoyska isku wakhti;
- Kala tashiga qoyska iyo khabiirada badqabka qoyska ka wada hadalka siyaasadaha mustaqbalka ama nidaamyada u gaar ah caruurta waadlidka ama cida ka masuulka ah la mastaafuriyay ama la xidhay, iyada oo diirada lagu saarayo ka caawinta ilmaha xaalada gaarka ah iyo yaraynta waxyeelada rasmiga ah ee ay ku keeni karto kala kaxaynta qoyska soo geleytiga ah;
- La kulanka wakiilada Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Maamulka Tilmaamaha Shacabka, OSPI) iyo degmo dugsiyeedka deegaanka si loo sameeyo khidado lagu yaraynayo khalkhalka waxbarshada iyo hormarka caruurta waalidkooda ama cida ka masuulka ahayn la mastaafuriyay ama la xidhay;
- Abuurista khad hore oo xidhiidh uu u dhaxeeya DCYF, OSPI, iyo degmo dugsiyeedyada deegaanka si ay u suurto gasho ficilada degdega ah iyo ka jawaabida hadii, tusaale ahaan, waalidka ama masuulka ilmaha loo qaado mastaafurid ama la xidho iyada oo ilmuhu uu dugsiga joogo, ama xaalado kale ay jiraan waxay hay'ada saaraysaa masuuliyad wax ka qabadka iyo la shaqaynta taageerada ilmaha;
- Kala shaqaynta jaamacadaha, kuuliyadaha, kuuliyadaha bulshada, iyo Running Start sidii loo sugi lahaa oo loo taageero lahaa jid wax ku ool ah o waxbarashada sare ah ee caruurta la kulantay jahwareerka waalidkooda ama cida ka masuulka ah ee laga mastaafuriyay ama laga xidhay;

- Siinta xogta ugu danbaysa ee joogtada ah Xafiiska Badhasaabka ee ku saabsan hawlaha Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah iyo siyaasadaha lagu taliyay; saamaynta mastaafurinta  ee shaqada DCYF; iyo wixii kale ee qorshahe ah ee cid dheeraad ah oo gacan saar la leeyahay ama iskaashiga hay'adaha dhaxdooda oo ka caawin kara caruurta la kulanta kala kaxaynta qoyska ee mastaafurinta ama xadhiga waalidka ama daryeelayaasha; iyo
- Siinta warbixinta kowaad Xafiiska Badhasaabka ugu danbayn Abriil 30, 2025, iyada oo kadibna sadex bilood oo kasta la siinayo ama iyada oo qaab kale ah mudada lagu heshiiyo Xafiiska Badhasaabka. Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah waa inay ka shaqayso sidii loo xaqiijin lahaa in warbixinteeda lagu gudbiyo si ay u heli karaan xubnaha shacabka iyad aoo luuqado badan ku qoran.

Xubnaha Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah waa inay kulaan oo ay gutaan masuuliyadooda mudo ah ugu yaraan hal sano, ama ilaa Febraayo 1, 2026, oo leh mudada iyo baaxada Kooxda Ka Jawaabida Degaga ah oo la kodhin karo oo wax ka bedel loogu samayn karo sida loogu baahdo ee ay ugu heshiiyaan Xafiiska Badhasaabka iyo DCYF.

Wareegtadan ayaa in loo fuliyo si waafaqsabn sharciga ku haboon. Bixinta Amarkan looguma talo gelin inuu wax ka bedelo heshiiska iskaashiga gorgortanka wada jirka ah. Amarkan looguma talo gelin in talo oo maaka talo wax xuquu sharci ama xuquuq oo waa in aan loo adeegsan in si sharci ah looga hor yimaado wax sharci ah ama talaabo qaadid ama talaabo qaadis la'aan hay'adaha dawlada iyo shaqaalaha ay ku waajibto.

Amarkan waxa uu dhaqan geleyaa. La saxeexay oo lagu riday gao rasmi ah oo gobolka Washington 27ka Janaayo, AD, Laba Kun iyo Labaatan iyo Shan, at Olympia, Washington.

## LIFAAQA E: Hawlaha Kooxda iyo Inta ay Le'eg Yihiin

### SHAQADA

Shaqada Kooxda waxaa weeye in la eego siyaasadaha oo lagu taliyo iyo talaabooyinka lagu yaraynayo-ilaa inta macquulka ah-waxyeelada, jahwareerka, iyo saamaynta kale ee mudada dheer ah ee caruurtu ay kala kulmayaan kala kaxaynta qoyska ee marka la mastaafuriyo ama xidhiga la xidhiidha deganaanshaha dalka ee waalidkooda ama daryeelayaashooda kowaad.

### BAYAANKA QIYAMKA

- **Caruurta iyo Dhalinyarta Ayaa Mudnaanta Kowaad leh:** Xaqiijinta in amaanka iyo badqabka joogtada ah ee caruurta ama dhalinyarta qoyskooda lakala kaxeeyo ayaa ah mudnaanta kowaad.
- **Bilaa Aadanimada ayaa Asalka ah:** DHAMAAN caruurta iyo qoysasku waxay u qalmaan maamuus, dhaqaalayn, cod, sharciga waafaqsan, iyo fahanka xuquuqdooda.
- **Sirta ka Qaybgalaha:** Mudnaanteenu waxaa weeye in la ilaaliyo sirta iyo macluumaadka shakhsi ahaaneed ee caruurta, dhalinyarta, iyo qoyska la shaqeeyo Kooxda, oo ma wadaagi doonaa macluumaadkan iyada oo uu ku khabsanyo moojee sharciga gobolka iyo federalku.

### HESHIISYADA LA WADAAGAY

- **Xushmayn:** Marwalba waxa aad yeelataa aragti wanaagsan. Aqoonsiga in dadka nagu xeeran ay hayaan khibrad, fikiro, tayo iyo ikhtiyaaro wanaagsan.
- **Iskaashiga:** Kaligeen shaqadan ma qan karno. Waa in lagala shaqeeyaa hay'adaha gobolka, cida bulshada iskaashiga la leeyahay, iyo khabiirada arrintan, taas oo keeneysa khibrada wada shaqayn, aqoon iyo khayraad.
- **Bahaajinta:** In daacad aad noqoto oo aad wadaagto waxa aad garanayso. Waa caadin in aanad ka jawaabin wax kasta; wax ayaanu baranayaa inta aanu socono.

## BAAXADA SHAQADA EE KOOXDA

- Abuurista layn lasii sameeyay oo isgaadhsiin oo hay'adaha gobolka iyo gudida, degmo dugsiyeedka, maxkamadaha dawladaha hoose, Qunsuliyadaha, hogaamiyayaasha baarlamaanka, iyo cida iskaashiga lagala leeyahay bulshada si loo xaqiijiyo in iskaashi joogto ah iyo gacan saar loo yeesho.
- Ogaanshaha isbedelka siyaasadaha hay'ada gobolka iyo nidaamyada si qaab dhaama loogu taageero qoysaska ay saamaysay kala kaxayntu.
- Ogaanshaha, samaynta iyo wadaagista qaabab siyaasadeed oo wax taraya/loogu baahan yahay dawladaha deegaanka iyo/ama cida iskaashi lagala leeyahay bulshada.
- Xaqiijinta siyaasada inaycad yihiin oo la heli karo, iyo sidoo kale naqdinta, iyo hadii loo baahdo, samaynta tobobarada shaqaalaha hay'ada gobolka ee ku saabsan siyaasaha iyo nidaamyada.
- Samaynta iyo wadaagista talaabooyin la qaadi karo iyo nidaamyada dawlada gobolka iyo deegaanka oo ka jawaabaya oo ka hadlaya baahiyaha mudada dheer ee caruurta bilaa daryeelaha ah.
- In la wadaago fahanka nidaamka iyo nidaamyada, kaalinta iyo masuuliyadaha.
- Bixinta liiska khayraadka gudaha iyo banaanka iyo talooyinka halka caruurta iyo qoysasku ay ka heli karaan khayraadka qorshaynta iyo diyaarinta qoyska, kaalmada sharciga, adeegyada caafimaadka maskaxda, turjubaada iyo adeegyada tarjumida, iyo hay'adaha kale ee gobolka iyo bulshada-iyada oo ku xidhan khayraadka kahor ama kaidb macamilka Immigration and Customs Enforcement (Ciidanka Laanta Socdaalka, ICE) ama ciidamada kale ee laanta socdaalka federlaka.

## WIXII KA BAXSAN SHAQADA KOOXDA

- Inay noqdaan cida kala hadlaysa cabashada ICE
- Ka jawaabida dhamaan su'aalaha la xidhiidha laanta socdaalka
- Bixinta kaalmada dhaqaale si loo midaabo qoysaska
- Ka hadalka qoysas ama caruur gaar ah*
- Bixinta talo sharci oo kiiska u gaar ah

## XUBNAHA KOOXDA

Kooxda waxay ka kooban yihiin wakiilo hay'adaha gobolka iyo gudiyo. Waxa aanu soo dhawaynaa xeer dejiyayaasha, cida bulshada la iska kaashado, iyo martida kale si ay uga qayb gasho. Kooxda waxay wakhti xaadirkan ka kooban yihiin 25 hay'adood oo gobol oo ku qoran liiska Lifaaqa A.

Kooxda waxay dhamaystiri doonaan yoolashan iyaga oo sidoo kale u hogaansami doona sharciga gobolka iyo federalka. Muhiimiyada, u hogaansanka sharciga gobolka, DCYF ma siiso macluumaad ciidanka laanta socdaalka federalka bilaa amar maxkamadeed ama waaran maxkamadeed, ama iyada oo waalidku ay saxeexaan moojee bixinta macluumaadka gobolka oo sheega waxa la bixin karo.

**Iyada oo Kooxda aanu si toos ah uga hadli karin ama ka jawaabi karin kiisaska gaarka ah, DCYF iyo hay'adaha kale ayaa ka hadla, sida kolba u munaasabka ah.*





Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

www.dcyf.wa.gov

*Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka **communications@dcyf.wa.gov.***

DCYF PUBLICATION ADM_0033 SM (06-2025) Somali